



Macalimadda Dugsiga Sare ee Franklin Mercedes Muñoz waxay ku guulaysatay macalinka sanadka ee Oregon

Hal xusitaan ayaa ugu yeertay Mercedes Muñoz a “xoog dabiici ah.” Mid kale ayaa yiri waa “dareen muuqda oo sharaf cadaadis la kulmaysa ah.” Mid saddexaad ayaa yiri ardadeedu waa “nasiib aan la koobi karin u leh in ay ayada haystaan.”

Hadda waxaa jira hal shay oo dheeri ah oo aad ka dhihi karto macalinka waxbarashada khaaska ah ee Dugsiga Sare ee Franklin: Waa Macalinka Sanadka Oregon ee 2020.

Xaflad la yaab ah Jumcada gudaha jimicsiga Franklin, Madaxa Dugsiga Dadweynaha ee Portland Guadalupe Guerrero iyo Maamulaha Chris Frazier waxay ku biiren Colt Gill, Agaasimaha Waaxda Waxbarashada ee Oregon, soo bandhigidda Muñoz oo abaal marinta haysata.

“Ka macalin waxbarashada khaaska ahaan, Mercedes waxay siisaa rajo iyo dhiiri galin maalinle ah ardo fara badan oo leh baahiyo kala duwan oo ah cilmi, bulsho iyo dareen,” Gill ayaa yiri. “waxaan sugayaa saamaynteeda ah in ay tusaale u noqoto dhammaan macalimiinta gobolkeenna oo dhan sanadkaan!”

ODE waxay soo andhigaysaa macalinka sanadka si wadaag la ah Bakhtiyaa nasiibka Oregon. Abaal marinta waxaa ku jira \$5,000 abaal marin kaash ah, ayadoo Franklin helayso \$5,000 oo ku aadan.

Muñoz waxay u shaqaynaysay khabiir wax barasho ahaan ilaa 2013, waxayna muhiim u ahayd soo saarista iyo meel marinta qaabka “push-in” (“gudaha-riix”) ee waxbarashada gaarka ah. Push-in waa hanaan wada shaqayn iyo guda jir kaasoo u keenaya hagitaan iyo ashyaardada waxbarashada gaarka ah si loo hubiyo in ay helaan helitaan buuxa oo manhajka waxbarashada guud ah asagoo yareynaya wax kasta oo caqabad ah ee jadwalkooda maalin laha ah.

Elizabeth Kirsch waxay la shaqaysay Muñoz, taasoo u shaqaysay macalin push-in ahaan fasalkeedii sophomore ee Ingiriiska inta lagu guda jiray sanad dugsiyeedkii. Waxay sheegtay Muñoz in ay noqotay mid dhex taagan fasalka dhexdiisa, ayadoo caawinayn kaliya ardada waxbarashada gaarka ah, laakiin dhammaan ardada.

“Ma caddayn karo si ku filan awoodda Mercedes ee dhisidda xiriir xooggan ay la yeelato ardada,” capacity for building strong relationships with students,” Kirsch wrote in a nominating letter. “waa mid ka mid ah ashyaada u ogolaanaya ayada in ay noqoto mid wax ku ool ah sida ayadoo ah bare.”

Macalinka waxbarashada khaaska ah ee Dugsiga Sare ee MadisonMadison Andy Clark, Kaasoo Muñoz kala shaqeeyay Franklin, ayaa yiri inkastoo culays aad u balaaran, Muñoz waxay heshaa waqti ay ku saamayso kuwa kale.

“Wali waxay helaysaa waqti ay ku caawiso macalimiinta cusub ee SPED ardadooda, waxay la shaqaysaa macalimiinta waxbarashada guud waxayna garwadeen ka noqotaa deegaan badi loo siman yahay,” waxa uu ku qoray warqad magacow.

Muñoz waxay noqotay macalinkii shanaad ee Dugsiyada Dowladda ee Portland eek u guulaysta abaal marinta, taasoo markii ugu horeysay lasoo bandhigay 1955tii. Ku guulaystayaashii hore ee PPS:

1962: Lorraine Sabo, Dugsiga Bilowga ah ee Lewis

1970: Carlton Bryson, Dugsiga Sare ee Benson

2012: Elena Garcia-Velasco, SEIS Dugsiga Sare ee Roosevelt

2017: Matthew Bacon-Brenes, Dugsiga Dhexe ee Mt. Tabor

Ayadoo qayb ka ah helitaanka abaal marinta, Muñoz waxay u shaqayn doontaa afhayeenka iyo matalaha dhammaan macalimiinta Orego waxayna xaadiri doontaa Asbuuca Aqoonsiga ah ee Macalimiinta Sanadka guda Washington, D.C. xagaagaan. Waxay sidoo kale heli hal sano oo xirfad hourmarin iyo shabakadayn ah oo ay la qaadanayso macalimiinta kale ee Sanadka Gobolka.